

Caawimaada Dhanka Dhimirka ee Balaaran ee Xanuunka Lawlawga (CBIT)





Sanadkii 2001, Iskaashatada Cilmiga Habdhaqanka ee Tourette Association of America ayaa tijaabshay oo soo daabacay daraasadii koobaad oo cabirkeedu wayn yahay taasoo muujinaysa in daawaynta aan ahayn daawada ay si wayn u yarayn karto darnaanta xanuunka lawlawga. Daawayn waxaa loogu yeeraa Caawimaada Dhanka Dhimirka ee Balaaran ee Xanuunka Lawlawga ama CBIT (sii-bit). Abuurista daawayntaan cusub ayaa rajo wayn iyo farxad u noqonaysa dadka qaba xanuunka Tourette Syndrome (TS). Ujeedada buugaan waa in lagu baro daawada CBIT iyo su'aalaha guud ee ku saabsan daawaynta, looga hadlo waxtarka daawada CBIT, loona qeexo sida lagu heli karo dhakhtarka CBIT oo tababaran.

Waa maxay CBIT?

CBIT waa daawayn aan daawo caadi ah ahayn oo logu talagalay xanuunka lawlawga, taasoo ka kooban sadex qaybood oo muhiim ah:

- (a) Barista bukaanka inuu wacyi badan u lahaado xanuunkiisa lawlawga iyo damaca ah inuu dhaqdhaqaaqa noocaas ah sameeyo.
- (b) Barista bukaanka inay sameeyaan habdhaqan kahortag ah marka ay dareemaan damaca lawlawga.
- (c) In isbadello lagu sameeyo shaqooyinka maalin kasta ayadoo la adeegsanaayo qaabab muhiim u ah yaraynta xanuunka lawlawga

Qaar badan oo kamid ah xeeladahaan ayaa marhore badanaa loo adeegsan jiray maaraynta ciladaha xanuunka TS. Dad badan oo qaba xanuunka TS ayaa soo sheegay inay heleen xeelado lamid ah kuwa CBIT si ay u maareeyaan xanuunkooda lawlawga. CBIT ayaa qaadanaaya fikradaha ugu waxtarka badan kadiibna ku dhafaaya xeelado ka taageeraaya dadka inay farsamooyinka u bartaan si dhakhso ah.

Sidee ayaa ku baranaysaa daawaynta CBIT?

CBIT waa baxnaanin hanaan sareeya leh oo uu asbuuciiba halmar sameeyo dhakhtarka baxnaaninta. Daawaynta caadiga ah waa sideed kulan oo la samaynaayo muddo toban asbuuc ah, laakiin waa la kordhin karaa si loo daboolo baahiyaha bukaanka iyo kuwa qoyskiisa. Talaabada koobaad ee CBIT waa in la baraa bukaanka la qabsiga xanuunka lawlawga iyo damaca kusoo dhacaaya kahor intaan xanuunka lawlawgu qaban. Talaabada xigta waa in la baro bukaanka jawaab celin kahortag ah oo uu adeegsan karo marka bukaanku ogaado in jirkiisu damcaayo samaynta dhaqdhaqaaqa lawlawga ama uu ogaado inuu lawlaw samaynaayo. Jawaab celinta kahortaga ah waa habdhaqan qaas ah ama dhaqdhaqaaq kahortagaaya in jirku lawlaw sameeyo. Talaabadaan muhiimka ah waxay gacan ka gaysataa yaraynta, iyo mararka qaar, baabi'inta xanuunka lawlawga. Tusaale, xanuunka riiraxyada aan la xakamayn karin ayaa la bari karaa qofka inuu tartiib u neefsado markuu dareemo damaca ah in riiraxyada lawlawgu ku timaado. Gacan saarida madaxa ayaa loo adeegsan karaa kahortaga lawlawga ruxashada madaxa. Bukaanka waxaa la barayaa inuu aqoonsado damaca uuna bilaabo inuu madaxa leexiyo ama qabto murqaha qoorta si uu uga hortago lawlawga.



Goobaha qaarkood, xaaladaha iyo falcelinnada ayaa kicin kara lawlawyada ugana sii dari kara. Waa halkaan meesha Caawimaada Shaqada (FI) lagu dhaqan gasho. Yoolka FI waa in la aqoonsado xaaladaha maalin kasta ee ugasiis daraaya xanuunka lawlawga iyo in loo badelo qaab ka dhigaaya xanuunka lawlawga mid ay yar tahay inuu qofka qabto.

Tusaale, qof xanuunkiisa lawlawgu uu aad joogto u noqday markuu samaynaayo layli guriga ama kahor intuu bandhig ku samayn shaqada ayaa la bari karaa inuu maareeyo walaaciisa ama walaaceeda kahor iyo inta lagu jiro xaaladahaan. Si taas lamid ah, qof bilaabaaya inuu khalkhalo si xad dhaaf ah marka uu u muddo badan fadhiyo, ayaa lgu boorin karaa inuu qaato nasiinooyinka mudaysan ee shaqada inta lagu jira maallinta oo dhan.

Waxaa markasta naloo sheegi jiray in xanuunka TS yahay xanuunka dhanka neerfaha ah iyo in xanuunka lawlawgu yahay wax uusan qofku xakamayn karin. Haddii arintaani run tahay, sidee ayay CBIT u shaqayn kartaa?

Su'aal kama taagna in lawlawgu yahay cilad dhanka neerfaha ah caadiyan. Hase yeeshee, lawlawga ayaa badanaa sidoo kale aad ugu nugul goobta uu qofku joogo marka uu qabanaayo xanuunku. Qof kasta oo qaba TS ayaa soo maray xaalado gaar ah oo lawlawgiisa ugasiis daraaya. Si taas lamid ah, inta badan dadka TS ka qaba ayaa og in xaalado ama nashaadaad kale ay yareeyaan xanuunkooda lawlawga. CBIT ayaa iskudayda inay ka caawiso carruurta iyo dadka waawayn inay naftooda baraan ayna aqoonsadaan sababaha dhanka bii'ada ee ugasiis daraaya xanuunkooda lawlawga. CBIT ayaa sidoo kale baraysa xirfado ku aadan sida loo abuuro bii'oyin leh xasilooni, la fahmi karo oo ay fududahay in la maareeyo.

Maadaama CBIT ay waxtar leedahay, tani ma waxay ka dhigan tahay in dadka qaba TS ay awoodaan inay ka adkaadaan xanuunkooda lawlawga?

Dadka qaba xanuunka lawlawga ayaa badanaa muddo kooban ka adkaan kara xanuunkooda lawlawga, laakiin tani kama dhigna inay xanuunka xakamayn karaan markasta. Xakamaynta kahortaga ah waa arin istarees badan oo badanaa lagu daalaayo, niyad jab badan waxayna kordhin kartaa camal xumada qofka. CBIT lamid maaha xakamaynta qofku samaynaayo ee xanuunka lawlawga. CBIT waxay dadka qaba TS baraysaa tiro xirfado gaar ah oo ay u adeegsan karaan maaraynta damaca xanuunka lawlawga ama dabeecadaha ayagoo adeegsan xakamaynta kahortaga ah. Baxnaaintu waxay u baahan tahay diirad saarid iyo in lagu tababarto si loo barto falcelinnada looga hortagaayo xanuunka. CBIT waxay dhiiri gelinaysaa ku tababarashada jawaabo kahortag ah oo gaar ah oo uu sameeyay baxnaaniye. Jawaabta kahortaga ah oo lagu samaynaayo qaab degan oo diirad saar leh ayaa hoos u dhigaysa xanuunka lawlawga una sahlaya bukaanka inay xakameeyaan xanuunkooda.

Waxaa la ii sheegay inaan waxba kasoo qaadin lawlawga cunugayga waayo waxay keenaysaa inuu ogaado inuu lawlaw qabo taasoo ugasi daraysa lawlawgiisa. Miyaan CBIT ugasi darayn xanuunka lawlawga?

Lawlawga ayaa badanaa kasii dara marka qofku ku walaaco sida in dareen gaar ah la siiyo marka qofku joogo guriga, dugsiga, ama goobta shaqada. Yoolka CBIT maaha in

carruurta iyo dadka waawayn noqdaan kuwo aad uga walwala xaaladooda, laakiin waa inay si dhab ah u yaqaanaan xanuunkooda lawlawga. Marka dadka qaba TS ay noqdaan kuwo ka warqaba xaaladooda ayna fahmaan waxa TS yahay, badanaa niyada ayaa u degta, waxay dareemaan awood iyo kalsooni – dareemadaan ayaa dhammaan sabab u ah hoos u dhaca lawlawga, mana kordhiyaan xanuunka lawlawga. CBIT, yoolka tababarka wacyiga qofku naftiisa ka haysto ayaa muhiim ah oo ka caawinaysa bukaanka inuu fahmo waxa ka yareeya ama ku kordhiya xanuunka lawlawga.



Waxaan maqlay in marka dadka qaba TS ay iskudayaan inay lawlawga joojiyaan, ay ugasi darayso lawlawyada kale ama ay keenayso inay kusoo laabtaan lawlawyadu kadib markay dhamaadaan dedaallada joojinta lawlawga. Miyaysan CBIT keenayn dhibaatooyinkaan, sidoo kale?

CBIT ma barayso qofka xakamaynta xanuunka si iskiis ah, taas badalkeed waxay baraysaa farsamooyin uu uga hortagaayo dabeecadaha keenaaya in xanuunka lawlawgu kaco ilaa damaca lawlawga ama lawlawga qudhiisu hoos u dhaco ama ka ba'o qofka. Ku tababarashada dabeecado kasoo horjeeda lawlawga maaha joojinta qasbida ah ee xanuunka. Daraasaadka ayaa muujinaaya in xeeladahaan lagu adeegsado CBIT aysan keenayn in lawlawga markaas ku haya uu kasii daro ama lawlaw cusub uu biloowdo. Taas badalkeed, lawlawyada cusub ama kasii darista lawlawyada markaas jiray ay qayb ka tahay xanuunka TS ayadood laga eegayn nooca daawaynta mana ahan cilad ka dhalan karta CBIT.

Miyuusan CBIT keenayn in falcelinta kahortaga ah ay dhaliso lawlaw cusub?

Bukaannada qaba TS ayaa badanaa isku arka inay yeeshaan lawlawyo cusub ayna kuwii hore ka ba'aan. Arintaan ayaa caadiyan lagu yaqaanaa TS. Bukaannada ayaa mararka qaar walaac ka qaba in samaynta falcelin kahortag ah ay ku noqoto lawlaw cusub. Nasiib wanaag, ma jirto cadayn muujinaysa in arintaani dhacdo. Maaha wax badanaa ay soo sheegeen bukaanku lagumana arkin cilmi baarista.

Waxtar intee dhan ayay CBIT u leedahay qof qaba TS?

Daraasaad waawayn, oo xarumo badan lagu sameeyay, ayna maal geliyeen Macaahida Qaran ee Caafimaadka ayaa muujinaaya in wax ka badan nus dadka lagu sameeyay daawaynta CBIT uu aad uga yaraan doonaan astaamaha daran ee xanuunka lawlawga ayna lahaan doonaan awooda shaqada jirka oo sidii hore ka wanaagsan. Baabi'inta buuxda ee dhammaan astaamaha xanuunka lawlawga iyo ciladaha kale ee TS ayaa mararka qaar lagu gaari karaa CBIT. CBIT maaha daawayn loo helay TS laakiin waa farsamo ka caawinaysa dadka inay si fudud u maareeyaan xanuunkooda lawlawga ayna kor u qaadaan tayada noloshooda.

Gof kasta oo qaba TS ama lawlawga ma adeegsan karaa CBIT?

Waa muhiim in la fahmo inaan qof kasta ka faa'iidayaan doonin CBIT. Barista farsamadaan carruurta qaba xanuunka ADHD ee aan la dawayn ayaa aad u adag sabab la xariirta dhibaatooyin ka haysta diirad saarida, maahsanaanta maskaxda iyo inaysan dulqaad badan u lahayn niyad jabka. Si taas lamid ah, xanuun kasta oo dhanka dhimirka ama bulshanimada ah oo carqalad ku ah ka qaybgalka daawaynta ayaa ka dhigi kara CBIT mid dhib badan. CBIT ayaa la adeegsan karaa ayadoon la daawayn xanuunnada kale, laakiin waxaan ku talinaynaa in bukaannadu xaliyaan xanuuno kale oo la socda lawlawga ayagoo iska baaraaya. Xanuunadaan ama ciladahaan ayaa carqalad ku noqon kara awooda barashada CBIT.

CBIT ma wax fudud baa in la sameeyo?

CBIT ayaa u muuqan kara farsamo fudud iyo daawayn, laakiin ogoow inay u baahan tahay dedaal iyo waqti si CBIT wax u tarto, si lamid ah xirfad kasta oo cusub. CBIT ayaa noqota wax fudud muddo markaad wado.

Ma tahay in CBIT loo adeegsado muhiimada koobaad ee daawaynta, mise lala adeegsado daawoyinka la cuno, ama haddii aan daawo cuno, ma joojin karaa dawada?

Go'aankaan waa inuu gaaraa dhakhtar caafimaad oo khibrad u leh. CBIT ayaa isticmaalkeedu aad u kordhayaa waxaana loo adeegsan karaa daawada koobaad ee ugu muhiimsan inay noqoto. Laguma talinaayo inaad joojiso ama yarayso daawoyinka lawlawga kahor intaadan bilaabin CBIT ilaa in farsamadaan uu ku taliyay maahee dhakhtarka daawada u qoray bukaanka.



Marka aan si fiican ula qabsado, CBIT ma waxay soconaysaa intaan noolahay?

Daraasad dhawaan soo baxday ayaa muujisay in 87% dadka ka qaybgalay ay ku bogsoodeen CBIT kadib markay wadeen daawada muddo lix bilood ah. Xasuunoow CBIT maaha daawo; waa farsamo maarayn ah. Bukaannada ayaa barta tiro xirfado maarayn ah oo ay ku dabiqli karaan qaybaha kale ee noloshooda markay u baahdaan.

Maadaama CBIT tahay daawaynta dabeecada, ma waxay taasi ka dhigan tahay inaan ku ciqaabo cunugayga lahaanshaha ciladaha lawlawga aana ku abaal mariyo marka uu yeelan waayo lawlawga?

Muddo ka badan 30 sano, xirfadleyaasha ayaa diiday adeegsiga habraacyada ganaaxida ah ee ku aadan xanuun kasta. CBIT ma adeegsanayso ama kuma talinayso in qofka lagu ganaaxo astaamaha lawlawga; waxay adeegsataa taas kasoo horjeedkeeda. Ku ciqaabida ilmaha inuu leeyahay astaamaha lawlawga ama inuusan kahortagayn astaamaha lawlawga ayaan wax macno ah lahayn. Sabaalinta ilmaha, kor u qaadista codka, ama ka qaadashada waxyaabaha uu jecel yahay sabab la xariirta lawlawga ayaan wax faa'iido ah keenayn waxayna u badan tahay inay dhaliyaan walaac ayna ugasii daraan lawlawga. Sidoo kale wax faa'iido ah ma keenayso in ilmaha lagu abaal mariyo inay iska ilaaliyaan lawlawga qabanaaya.



Hal kamid ah farxada ugu waaywayn ee ka caawinaaya ilmaha inay bartaan CBIT waa inay farxadooda la wadaagaan dadka markay si buuxda u bartaan farsamooyinka ayna bilaabaan in astaamaha lawlawgu ka yaraadeen. Si loo gaaro yoolkaas, waxaan doonaynaa in carruurta bartaan falcelintooda kahortaga ah waxaana doonaynaa in waalidku ku abaal mariyaan kuna taageeraan ilmahooda dedaalkiisa (maaha hoos u dhaca lawlawga). CBIT ayaa noqon karta wax adag in la barto, sidaas awgeed taageerada waalidka iyo xirfadleyaasha iyo falcelin wanaagsan oo laga baxsho in ilmuhu ku tababaranayaan xirfadahooda maaraynta ee CBIT ayaa muhiim u ah ka caawinta ilmaha biloowga daawaynta ku jira.

Maxay tahay inaan sameeyo haddii cunugaygu uu diido inuu sameeyo tababarkiisa CBIT?

Meeqa naga mid ah ayaa sameeya waxa maslaxadiisa koobaad ku jirto - jimicsi, cunista cunto sax ah, seexashada hurdo wanaagsan habaynkii, iwm.? Samaynta wax ku cusub noloshada maaha wax fudud markasta. Qaar kamid ah carruurta qaba TS ayaa dhibaato ku qabi kara barashada CBIT. Aqoonsiga dhibka ay ku tahay, ka caawinta inay mooraal u yeeshaan, iyo ku dhiiri gelinta inay iskudaygooda sii wadaan ayaa ah dhammaan doorar uu waalidku leeyahay.

Sidoo kale waa muhiim in la baro dadka kale, macalimiinta, shaqaalaha dugsiga iyo loo shaqeeyaasha farsamada CBIT si ay u taageeraan dedaaladaan ayna gacan uga gaystaan abuurista iyo joogtaynta bii'ada wanaagsan ee muhiimka ah si CBIT waxtarka ugu fiican u yeelato.

Xagee ayaan aadi karaa si aan u sameeyo CBIT?

CBIT waxaa ku bari kara dhakhtar tababaran, ayna ku jiraan khubarada dhimirka, dhakhaatiirta, kalkaalisooiyin, shaqaalaha bulshada, ama baxnaaniyaal kale. Si lamid ah daawo kasta, tababarka iyo xirfada dhakhtarka ayaa muhiim u ah natiijada. Waxaan ku talinaynaa in keliya khubarada baxnaaninta ee tababarka u qaba mabaadii'da baxnaaninta garaadka qofka qaatayna tababarka gaarka ah ee CBIT ay sameeyaan daawayntaan. Nasiib daro hadda, dhawr kamid ah khubarada caafimaadka ayaa tababar ku qaba CBIT.

TAA waxay abuuraysaa barnaamijyada tababarka CBIT oo lagu samaynaayo wadanka oo dhan. Hase yeeshee, wali waxaa jirta hoos u dhac dhanka baxnaaniyaasha ah oo tababar ku qaba CBIT. Qaar kamid ah xirfadleyaal aan tababar fiican ku qabin CBIT ayaa iskudayi doona inay saameeyaan daawayn, waana muhiim in la fahmo in natiijoyinkooda aysan noqon doonin kuwo u wanaagsan sida kuwa uu baxsho xirfadle caafimaad oo tababar iyo khibrad u leh CBIT. Waxaan kugu boorinaynaa inaad si taxadar leh u xulato baxnaaniyahaaga aadna wax ka waydiiso tababarka uu ku haysto CBIT.

Ayagoo aqoonsanaaya cariiriga dhanka Baxnaaniyaasha dhimirka ee tababaran si ay u daaweeyaan Xanuunnada Tourette Syndrome iyo Lawlawga, Tourette Association ayaa aasaasay Tourette Syndrome Behavior Therapy Institute (TS-BTI, Machadka Baxnaaninta Dhimirka ee Xanuunka Tourette Syndrome). Asagoo ay abuurteen xubnaha Tourette Association Behavioral Science Consortium (Isbahaysiga Cilmiga Dabcada ee Uururka Tourette Association), barnaamijka ayaa loo sameeyay inuu gacan ka gaysto kordhinta tirada iyo helitaanka baxnaaniyaasha u tababaran CBIT.

Barnaamijyada waxaa lagu sameeyaa heer qaadi ah ayadoo lagu baxsho goobo kaladuwan oo ku yaala wadanka oo dhan waxaana bixisa kuliyadeena TAA TS-BTI. Marka la dhameeyo barnaamijka iyo kulannada talo bixinta ah, ka qaybgeleyaasha ayaa lagusoo daabici doonaa liiska tixraaca baxnaaniyaasha CBIT oo ay hayaan Tourette Association. Si aad xog dheeri ah u hesho ama iskaga diiwaan geliso barnaamijka TS-BTI, fadlan booqo tourette.org ama wac 888-4TOURET.



Xog kooban

CBIT waa farsamo awood badan oo la ogaaday inay yaraynayso darnaanta xanuunka lawlawga, waxayna muujinaysaa fahan casri ah oo ku aadan sida maskaxda ay u hagi karto bii'adu. Tourette Association iyo laanta Behavioral Science Consortium ee Uururka ayaa ku dedaalaaya inay si qeexan uga warbixiyaan waxa cilmi baaristu ka dhigan tahay si daawaynta loogu adeegsado qaab sax ah oo waxtar leh.

TIXRAACYADA

Piacentini, J., Woods, D.W., Scahill L., Wilhelm, S., Peterson, A.L., Chang, S., Ginsburg, G.S., Deckersbach, T., Dziura, J., Levi-Pearl, S., Walkup J.T., 2010, Behavior Therapy for Children with Tourette Disorder: A Randomized Controlled Trial. *Journal of the American Medical Association*, 303:1929-1937.

Woods, D.W., Piacentini, J.C., Chang S.W., Deckersbach, T., Ginsburg, G.S., Peterson, A.L., Scahill, L.D., Walkup, J.T., Wilhelm, S., 2008, Managing Tourette Syndrome. A Behavioral Intervention for Children and Adults. Oxford University Press.

Chang S.W., Piacentini, J. & Walkup, J.T., 2007, Behavioral Treatment of Tourette Syndrome: Past, Present, and Future. *Clinical Psychology Science and Practice*, 14(3):268-273.

XOG KU SABASAN TOURETTE ASSOCIATION BEHAVIORAL SCIENCE CONSORTIUM (ISKAASHATADA CILMIGA CAAFIMAADKA DABEECADA EE URURKA TOURETTE)

Tourette Association's Behavioral Science Consortium waxaa la aasaasay 2001. Xubnaha ayaa ka kooban dad horay u qaatay abaal marinnada deeqda Tourette Association kuwaasoo isku yimid si ay u hormariyaan hormarka cilmigaan ayagoo tijaabinaaya CBIT. Shaqada Behavior Science Consortium waa inay abuuraan, tijaabiyaan, ayna faafiyaan daawooyinka dabeecada oo ku salaysan cadayn si loogu daaweeyo carruurta iyo dadka waawayn ee qaba xanuunka ourette Syndrome.

XOG KU SAABSAN QORAAYAASHA

Doug Woods, Ph.D., waa xubin kamid ah Gudigga Talo Bixinta Caafimaadka ee Tourette Association, Ku xigeenka Madaxa Waxbarashada Heerarka sare ee jaamacada iyo Xirfada iyo Gudoomiyaha Kuliyaadaha Heerka Sadaxaad ee Marquette University.

John Piacentini, Ph.D., A.B.P.P., waa Gudoomiyaha Tourette Association Behavioral Science Consortium iyo Barafasoor ahna Agaasimaha UCLA Child OCD, Anxiety, and Tic Disorders Program iyo TAA Center of Excellence ee UCLA.

John T. Walkup, M.D., waa xubin kamid ah Agaasimeyaasha Tourette Association, Madaxa Waaxda Dhimirka ee Ann and Robert H. Lurie Children's Hospital ee Chicago iyo Barafasoor Cilmiga Dhimirka ka dhiga Northwestern University Feinberg Kuliyaad Caafimaadka.

Daabacadaan waxaa loogu talagalay inay xog bixiso. Qoysaska waxaa lagu boorinayaa inay marka koobaad la tashtaan dhakhtar si ay u waydiiyaan dhammaan daawaynada iyo daawooyinka.

Taageerada barnaamijyada wacyi gelinta ah waxaa suuragashay (qayb ahaan) heshiis iskaashi oo sumadiisu tahay IU38DD000727-01 ayna bixisay Centers for Disease Control and Prevention. Fikradaha ku qoran xogta shirka ama daabacaadaha iyo kuwa ay jeediyeen dadka hadalka jeedinaayay iyo dhex-dhexaadiyaashu kama turjumayaan xeerarka rasmiga ah ee Department of Health and Human Services (Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadwaynaha), sheegista magacyada ganacsiyada, xeerarka ganacsiga, ama ururaduna kama dhigna dhiiri gelin cid gaar ah ay siinayso Dawlada Maraykanku.

Copyright © 2010

Waxaa Dib loo saxay Feebarayo 2019

Ogolaanshaha dib u daabacida buugaan qaab kasta oo ay tahayba waa in laga qaataa ourette Association of America